

Ciyaar wax-barasha ah: Tilmaamaha lagu hormarinayo xirfadaha waxbarasho ee ilmahaaga waqtiga ay guriga joga

(Playing to Learn: Tips to develop your young child's learning skills at home – Somali translation)

Carruurta yaryari waxay sida ugu fiican wax u bartaan markay la baashaalayaan qof iyaga daryeela iyaga oo jooga meel raaxo leh sida guriga. Tus ilmahaaga waxbarashadiisu inay tahay wax lagu farxo adoo ku dhisaya barashada ciyaarta hawl maalmeedkaaga.

Kuwan wa baaq tilmaamo:

- **U akhri** ilmahaaga maalin kasta, xitaa haddii ay heystan 10 daqiiqo oo keliya. Inta aad wada akhrisanaysaan, weydii ilmahaaga su'aalo. Maxaa hadda dhacay? Maxay dabeecaddaas sidaas u samayn kartaa? Qeyb ka mid sheekada wada jila.
- Bar ilmahaaga **ereyo cusub** inta lagu jiro howlaha maalinlaha ah sida labbiska, cunidda, iyo socodka. Xullo ereyo xiriir la leh ama qeexaya waxa aad isla qabanaysaan.
- Ka caawi cunugaada inuu **aqoonsado xarfaha iyo dhawaqa ay xarfaha sameyaan**. Tilmaan waraaqaha maalintii oo dhan: on sanduuqyada badarka, joornaalada, iyo calaamadaha waddooyinka.
- Dooro wax cunugaagu jecelyahay kahadalkiisa isla markaana samee ereyo. Weydiiso inay magacaabaan dhammaan xayawaannada ay ka fekeri karaan taas oo ka bilaabata xaraf kasta oo alifbeetada ah.
- **Tiri** walxaha aad ku aragto hareerahaaga. Sharax erayada sida imisa, ka badan, iyo ka yar. Tijaabi tan banaanka: "Ma dhagxaan ama ulo badan baa ku jira barxaddan?"
- Wada kariya buskudka oo tus ilmahaaga sida loo cabiro waxyaabaha ka kooban.
- Misaama Culeyska alaabta cunugga uu ku cayaaro ee uu jecel yahay ama ku cabbir mastarad ka dibna isbarbar dhig waxyaabaha kale ee gurigaaga yaalla. Adeegso oo sharax ereyada sida gaaban, dheer, dheer, balaaran, culus, iyo mid fudud.
- Tilmaan muuqaalada qaababka sida wareegyada, laba jibbaaranaha, laydi iyo saddexagalka ku xeeran gurigaaga iyo deriskaaga. Eeg haddii ilmahaagu tilmaami karo qaababka inta aad weelasha dhaqeyso.
- Ciyaar ciyaar xiiso leh sida "Waxaan arkaa" "I Spy" si aad ugu tababarto xirfado kala duwan. Tusaale ahaan, "Waxaan arkaa saddex waxyaalood oo qolkan ku jira oo leh qaab goobaabin ah." Ma tilmaami karta.
- Adeegso waxqabad madadaalo leh sida idinko wax wada karinaya, ama ciyaar kale wada ciyaaraya, si aad uga caawiso ilmahaaga inuu barto sida horay loo qorsheeyo loona raaco tilmaamaha. U oggolow inay gacan ka geystaan soo ururinta qalabka. Intii aad jidka ku jirtaan, xusuusi iyaga habka cuntada ama xeerarka ciyaarta.
- Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu **isugu duwo** walxaha sida alaabada lagu ciyaaro midab ahaan, qaab ahaan, ama cabbir ahaan. Adeegso oo sharax erayada isku mid ah, kuwa la midka ah, iyo kuwa kala duwan.

- **Abuur aagag wax lagu keydiyo** si aad u abaabusho waxyaabaha ilmahaaga u leeyahay (alaabta lagu ciyaaro, kabaha, buugaagta). Hadday suurtagal tahay, u hel cunuggaaga sanduuqyo yaryar oo uu ku qurxiyo iyadoo la isticmaalayo sawirro iyo ereyo. Sii waxyaabaha sida badhannada, xadhigga, xabagta, iyo dhaldhalaalka si ay tani u noqoto waayo-aragnimo xiiso leh oo taabasho leh.
- Bar ilmahaaga inuu ka **caawiyo howlaha guriga**. Hawlaha maalin kasta ka dhig kuwo madadaalo leh adigoo heesaya ama ka dhigaya tartan.
- **Ku dhiiri geli ilmahaaga inuu wax uun wax u qabsado** markasta oo ay suurta gal tahay. Ilaa inta ay nabad qabaan, ha u shaqeeyaan hawl in muddo ah. Sug ilaa ay caawimaad weydiistaan ka hor intaadan guda gelin.
- **Tus iyaga sida loo sameeyo**. Haddii ilmahaagu aanu diyaar u ahayn inuu qabto qaar ka mid ah waxqabadyadan, tus sida adigu adigu u sameysid. Ku dhiirrigeli tallaabooyinka yaryar si aad u dhammaystirto waxqabad.

Sida aad ugu abaabuleyso barashada waxqabadyada maalinlaha ah ee xiisaha leh waxay ku xirnaan doontaa dhaqanka qoyskaaga iyo waxa ilmahaagu jecel yahay inuu sameeyo. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa macalinka ilmahaaga talooyinka xirfadaha uu ku shaqeynayo. Tijaabi noocyada kala duwan ee waxqabadyada (aragtida, taabashada, dhageysiga) si aad u ogaato sida ugu fiican ee ilmahaagu wax u barto. Haddii ilmahaagu arko inaad madadaalo leedahay, waxay u badan tahay inay baashaalaan iyaguna! Ku ammaan dadaalka ilmahaaga, horumarka uu ku tallaabsaday, iyo guusha uu gaadhay. Ku dhiiri geli xiisaha oo tus sida ay u qancin karto waxbarashadu.